



War-Murtiyeed:

Date: 25-June 2016

Dalladda Daneeyayaasha aan Dawlīga ahayn ee PUNSAA waxa ay aad uga xuntahay xayiraadda ay Dawladda Puntland saartay Saxaafadda qaarkood. Talaabadaas oo lid ku ah xoriyadda saxaafadda, xoriyatul qawlka, iyo Dastuurka Puntland. waxa ay sidaas oo kale meel ka dhac ku tahay mabaadiida demoqaraadiyadeed ee Puntland ku dhisan tahay.

Dawladdu waxa ay xaq u leedahay in ay dacwad ku oogto suxufigii qalad ka gala iyo Warbaahintii ay u aragto in ay dembi ka gashay. Saxaafaduna waxa waajib ku ah in ay saxdo haddii ay qalad gasho raaligelina ay ka bixiso.

Meelna kagama dhigna Dastuurka Puntland in sifo sharci darro ah lagu xiro xarumo warbaahineed. Falka ay dawladu qaadey ee ay ku xirtay Idaacada Daljir waxa ay lid ku tahay qodobka 22aad ee Dastuurka Puntland oo qeexaya in Saxaafadda iyo warbaahinta xorta ahi ay ka madax banaanyihiin faragalin dawladeed, ayna u hogaasamayaan sharciga oo keliya. Waxa sidaas oo kale mudan in la tixgaliyo qodob ka 19 ee Baaqa caalamiga ah ee xuquuqul insaanka oo tibaaxaya xoriyada hadalka iyo cabirka fikirka iyada oo aan wax faragalin ah lagu sameyn. Baaqaas oo ay saxiixdey dawladda Soomaliya ee ay Puntland qaybta ka tahay.

Saxaafadu macne weyn ayey ugu fadhidaa bulshada, waxa ay ka heshaa warar, aqoon iyo wacyigelin, haddaba, xayiraad saxaafadda la saaraa waxaa ay bulshada seejineysaa maqalka iyo helitaanka waxyaabaha ka dhacaya dunida, gudo iyo dibadba.

Dalladda PUNSAA waxa ay aaminsantahay in aan Saxaafaddu xaq u lahayn in ay baahiso warar been abuur ah iyo kuwa bulshadda lagu kicinayo, sidaas oo kalena aan dawladu xaq u lahayn in ay xad gudub ku samayso saxaafadda oo ay ka qaado talaabo aan waafaqsanayn sharci, xeer iyo dastuur midna.

Waxanu Dawladda ugu baaqayna in ay ogolaato xoriyadda saxaafadda oo wixii ay qoonsato si hufan sharciga umariso. Sidaas oo kalena loo baahan yahay in suxufiintu ay dhowraan anshaxa saxaafadda una hogaasamaan sharciga dalka u yaala.

Gabagabadii;

1. Waxa Dalladda bulshada rayidka ah ee PUNSAA ay Dawladda Puntland ugu baaqaysaa in la turxaan bixiyo qodobadda khilaafaadku ka jiro ee Xeerka Saxaafada, kadibna la meel mariyo oo lagu dhaqo saxaafada.
2. Waxa Lagama maarmaan ah in bulshada laga ilaaliyo wax aaney raali ka ahayn islamarkaasna ay Dawladu xoriyadooda siiso suxufiyiinta iyo saxaafadda. Marna bulshadu ma aqbali karto in sharciga lagu tunto, Dastuurkana la baalmaro shacab iyo dawladba.

Mahadsanidiin

Nor Shire Osman

Gudoomiyaha Dallada PUNSAA

